GELLIDA TIKNOOLAJIYADA FAASHIYOONKA

Hanaanka Gellida ee Tiknoolajiyada Faashiyoonka

Maadaama uu barnaamijkayaga tiknoolajiyada faashiyoonku uu noqon doono barnaamijka Cutubka74 (Chapter 74), waxa lanooga baahanyay inaan raacno tilmaamaha gellida tiknoolajiyada faashooyinka ee ay sameysay Gobolka Massachusetts.
Hanaanka Cutubka 74 (Chapter 74) wuuxuu u baahanyay inay jiraan shan qeybood oo hanaanka gellitaanka ah: imtixaanka/wareysiga, dhibcaha, rikoorka imaansha, anshaxa/dhaqanka; iyo tallooyinka ka imaada dugsiga uu ardaygu kasoo baxay Ardayda waxa la siiyaa dhibco kooban oo ku saleysan dhamaan 5-ta dhinac. Dhamaan dhibacaha kooban ee 5-ta dhinac waxa loo tixgelin doonaa sida ay dhigayso boqoleydan soo socota:

- **50% dhibcaha ah:** imtixaanka/wareysiga la keeno imtixaanka qiimeynta. Guddi ka kooban wakiilada Kulliyada ProArts, farshaxano ka socda ururrada fanka ee bulshada iyo shaqaalaha BAA ayaa qaada imtixaanka/wareysiga
- **20% dhibcaha ah:** haddii uu ardaygu helay dhibco tacliimeed oo ku filan si uu u dhameystiro fasalka loo baahanyay. Tusaale ahaan arday codsanaya si uu u noqdo fasalka 9aad ee BAA waa inuu muujiyaa dhibco tacliimeed oo ku filan si uu u dhameystiro fasalka 8aad kahor codsiyada sannadka ee bisha Juun.
- **20% dhibcaha ah:** haddii uu ardaygu leeyahay rikoor imaansho oo ku filan si uu dhameystiro fasalka loo baahanyay. Tusaale ahaan, arday codsanaya si uu u noqdo fasalka 9aad ee BAA waa inuu muujiyaa imaansho ku filan si uu u dhameystiro fasalka 8aad kahor codsiyada sannadka ee bisha Juun.
- **5% dhibcaha ah:** rikoorka anshaxa/dhaqanka.
- **5% dhibcaha ah**: tallooyinka dugsiga uu ardaygu kasoo baxay

Dhameystirka Hanaanka Gellida

Haddii ardayga la aqbalo ama lagu daro liiska sugitaanka, isaga/iyadu waxa laga codsan doonaa inuu buuxiy **codsiga** ogolaanshaha. Ardaydu waxay soo diraan waraaqda natiiyonkooda iyo laba curis oo siiya fursada ay isku-bari karaan bulshada BAA. Warqada natiijooyinku waxay shaqaalaha u ogolaataa inay ardayga ku meeleeyaan fasalka ku haboon, curiskuna wuxuu ardayga baraa dugsiga waxaanay wargelisaa meelaynta laga talinayo.
Warqada natiijooyinka iyo curisku waa in lasoo diraa si loo dhameystiro hanaanka gellida, laakiin lama tixgeliyo marka la qaadanayo go'aannka gellida. Waxaan isla sidaa ka

codsanaynnaa ardayda ku jira liiska sugitaanka. Haddii arday la aqbalay uu diido ogolaanshaha, waxaan rabnaa inaan booskaa siino arday ku jira liiska sugitaanka sida ugu dhakhsaha badan ee suurogalka ah.

Liiska Sugitaanka Tiknoolajiyada Faashiyoonka

Ardayda lagu daray liiska sugitaanka tiknoolajiyada faashoyoonka waxay ku nagaan doonaan liiska ilaa iyo dhamaadka Diiisambar. Haddii ardaygu aanuu gellin kahor dhamaadka Diisambar iyada/isagu wuxuu u baahanyay inuu mar labaad dib u maro hanaanka gellida ee sannadka dugsiyeedka dambe si loogu tixgeliyo BAA.

Hanaanka Racfaanka Tiknoolajiyada Faashiyoonka

Students who are not accepted or are placed on the waitlist and would like an appeal must make an appointment with the Artistic Dean through the main office at Ardayda aan la aqbalin ama lagu daray liiska sugitaanka ee jeclaan lahaa inay racfaan gudbiyaan waa inay ballan sameeyaan ay kula kulmayaan hormuudka (dean) farshaxanka iyagoo u maraya xafiiska weyn 617-635-6470.

Shuruudaha Boortofooliyada (Portfolio)

- Waa inaad heysataa 12-15 nashqadood oo faashiyoon ah iyo ugu yaraan 5 farshaxan oo muujinaya waxyaabaha ku dhiirigeliya waxay doonaan haka sameysnaadaane.
- Ku dar shaqada aad sida fiican u qabato; muuji xoogagaaga (inta aad ku roontahay)
- Buugaagta sawirida (Sketchbooks) ayaa lagu dhiirigeliyay, laakiin shuruud maaha. Shaqada la dhameeyay ee buuga sawirida waxa loo tixgelin karaa qeyb kamida boortofooliyada codsiga.
- Wakhti kugu filan la qaado mid kasta oo kamida gabaladaada.
- Ardayda heysta farshaxanka dijitaalka ah ama barta internetkaa ee boortofooliyada way ku dari karaan, koombuyuter iyo internet waa la helayaa.
- Hubi in shaqadaada si fiican loo soo bandhigay (Boortofooliyo qaali ahi muhiim maaha)
- Muhim maaha inaad soo qaadato qalabkaaga fanka, waalagu siin doonaa.

Shuruudaha Imitixaanka

- Si fiican u dhageyso dhamaan sharaxaadaha oo weydii su'aalo haddii aanad wax fahmin
- Tixgeli xoogagaaga (inta aad ku roon tahay) oo isku day waxyaabo cusub
- Nashqadee adigoo niyada ku haya macmiilkaaga

Marka aad ku jirto imtixaanka hubi inaad:

- Maareyso wakhtigaaga

- Isticmaasho qalab kala duwan oo isku day inaad ka shaqeysiiso
- Muujiso qaabkaaga shaqada
- Soo qaadato saacad; waxay kaa caawin doontaa inaad wakhhtigaaga ka warheyso
- Sidaada ugu fiican u shaqeyso oo aad iska baashaal (have fun)
- Xaliso mushkiladaha oo noqo hal abuur iyo ma baqde

Bortofooliyada iyo imtixaanada waxa lagu xukumi doonaa kuwan soo socda:

- Awooda uu ku raaco tilmaamaha
- Maareynta wakhtiga
- Siyaabaha uu qofku u dhaqmo
- Ikhtiraacida
- Halabuurka fanka/Nashqadeynta
- Si fiican u isticmaalida qalab kala duwan
- Farsamada
- Soo bandhigida

GELLIDA FANKA MUUQAALKA

Hanaanka Gellida ee Fanka Muuqaalka

Maadaama uu barnaamijkayaga tiknoolajiyada faashiyoonku uu noqon doono barnaamijka Cutubka74 (Chapter 74), waxa lanooga baahanyay inaan raacno tilmaamaha gellida tiknoolajiyada faashooyinka ee ay sameysay Gobolka Massachusetts.
Hanaanka Cutubka 74 (Chapter 74) wuuxuu u baahanyay inay jiraan shan qeybood oo hanaanka gellitaanka ah: imtixaanka/wareysiga, dhibcaha, rikoorka imaansha, anshaxa/dhaqanka; iyo tallooyinka ka imaada dugsiga uu ardaygu kasoo baxay. Ardayda waxa la siiyaa dhibco kooban oo ku saleysan dhamaan 5-ta dhinac. Dhamaan dhibacaha kooban ee 5-ta dhinac waxa loo tixgelin doonaa sida ay dhigayso boqoleydan soo socota:

- **50% dhibcaha ah:** imtixaanka/wareysiga la keeno imtixaanka qiimeynta. Guddi ka kooban wakiilada Kulliyada ProArts, farshaxano ka socda ururrada fanka ee bulshada iyo shaqaalaha BAA ayaa qaada imtixaanka/wareysiga
- **20% dhibcaha ah:** haddii uu ardaygu helay dhibco tacliimeed oo ku filan si uu u dhameystiro fasalka loo baahanyay. Tusaale ahaan arday codsanaya si uu u noqdo fasalka 9aad ee BAA waa inuu muujiyaa dhibco tacliimeed oo ku filan si uu u dhameystiro fasalka 8aad kahor codsiyada sannadka ee bisha Juun.
- **20% dhibcaha ah:** haddii uu ardaygu leeyahay rikoor imaansho oo ku filan si uu dhameystiro fasalka loo baahanyay. Tusaale ahaan, arday codsanaya si uu u noqdo fasalka 9aad ee BAA waa inuu muujiyaa imaansho ku filan si uu u dhameystiro fasalka 8aad kahor codsiyada sannadka ee bisha Juun.
- **5% dhibcaha ah:** rikoorka anshaxa/dhaqanka.
- **5% dhibcaha ah**: tallooyinka dugsiga uu ardaygu kasoo baxay

Dhameystirka Hanaanka Gellida

Haddii ardayga la aqbalo ama lagu daro liiska sugitaanka, isaga/iyadu waxa laga codsan doonaa inuu buuxiy **codsiga** ogolaanshaha. Ardaydu waxay soo diraan waraaqda natiiyonkooda iyo laba curis oo siiya fursada ay isku-bari karaan bulshada BAA. Warqada natiijooyinku waxay shaqaalaha u ogolaataa inay ardayga ku meeleeyaan fasalka ku haboon, curiskuna wuxuu ardayga baraa dugsiga waxaanay wargelisaa meelaynta laga talinayo.
Warqada natiijooyinka iyo curisku waa in lasoo diraa si loo dhameystiro hanaanka gellida, laakiin lama tixgeliyo marka la qaadanayo go'aannka gellida. Waxaan isla sidaa ka codsanaynnaa ardayda ku jira liiska sugitaanka. Haddii arday la aqbalay uu diido ogolaanshaha, waxaan rabnaa inaan booskaa siino arday ku jira liiska sugitaanka sida ugu dhakhsaha badan ee suurogalka ah.

Liiska Sugitaanka Fanka Muuqaalka

Ardayda lagu daray liiska sugitaanka tiknoolajiyada faashoyoonka waxay ku nagaan doonaan liiska ilaa iyo dhamaadka Diiisambar. Haddii ardaygu aanuu gellin kahor dhamaadka Diisambar iyada/isagu wuxuu u baahanyay inuu mar labaad dib u maro hanaanka gellida ee sannadka dugsiyeedka dambe si loogu tixgeliyo BAA.

Hanaanka Racfaanka Fanka Muuqaalka

Ardayda aan la aqbalin ama lagu daray liiska sugitaanka ee jeclaan lahaa inay racfaan gudbiyaan waa inay ballan sameeyaan ay kula kulmayaan hormuudka (dean) farshaxanka iyagoo u maraya xafiiska weyn 617-635-6470.

Shuruudaha Boortofooliyada

- Ardaydu waa inay 10-12 gabal ku heystaan boortofooliyadooda.
- Ardaydu waa inay ku daraan shaqada ay si fiican u qabtaan, muujiyaan xoogagooda (inta ay ku roon yihiin)
- Ardaydu waa inay ku daraan farsamooyinka iyo fikradaha iyaga ku cusub.
- Ardaydu waa inay abuuraan farshaxan iyagoo isticmaalaya qalab kala duwan

Tusaale:

- Qalin beensal/rasaas
- Khad
- Qalin beensal/rasaas midab leh
- Dhoobo
- Warqad, isku dar (waxyaabo la isku keen-keenay)
- Sawir qaadis (sawirada waa in la qaadaa oo waa inuu soo daabacaa/sameeyaa ardaygu)
- Rinji
- Dhuxul/tamaashiir
- Iwm (iyo wixii lamida)!
- Ardaygu waa inay isku dayaan inay mawduucyo badan ku daraan boortofooliyadooda.
- Buugaagta sawirida (Sketchbooks) ayaa lagu dhiirigeliyay, laakiin shuruud maaha. Shaqada la dhameeyay ee buuga sawirida waxa loo tixgelin karaa qeybkamida boortofooliyada codsiga.
- Ardayda heysta farshaxanka dijitaalka ah ama barta internetkaa boortofooliyada way ku dari karaan, koombuyuter iyo internet waa la helayaa.
- Ardayda ay boortofooliyadooda ku jiraan sawiro kartoon ah oo badan waa inay kaliya ku daraan shaqadooda asliga ah oo aanay noqon nuqulada sawiro majaajilo oo hore u jira. Majaajilada waxa loo sameyn karaa qaab gaara (micnaha., Filin kartoon, Qaabka Jabaaniiska), laakiin sawirada ay hore u sameeyeen kartooniistayaashu waa inaan nuqul laga soo sameyn si loogusoo bandhigo boortofooliyada BAA.

- Ardaydu waa inay shaqadooda usoo bandhigaan si fiican laakiin boortofooliyo qaali ahi muhiim maaha!
- Muhim maaha inaad soo qaadato qalabkaaga fanka, waalagu siin doonaa.

Shuruudaha Imitixaanka

- Si fiican u dhageyso dhamaan sharaxaadaha oo weydii su'aalo haddii aanad wax fahmin
- Tixgeli xoogagaaga (inta aad ku roon tahay) oo isku day waxyaabo cusub

Marka aad ku jirto imtixaanka hubi inaad:

- Maareyso wakhtigaaga
- Fiiriso walxaha kala duwan ee imtixaanka
- Isticmaasho qalab kala duwan oo isku day inaad ka shaqeysiiso
- Isticmaasho dhamaan bogga
- Xaliso mushkiladaha oo aad noqoto hal abuur iyo ma baqde
- Soo qaadato saacad; waxay kaa caawin doontaa inaad wakhhtigaaga ka warheyso

Boortofooliyada iyo imtixaanada waxa lagu xukumi doonaa kuwan soo socda:

- Awooda uu ku raaco tilmaamaha
- Maareynta wakhtiga
- Ikhtiraacida
- Siyaabaha uu qofku u dhaqmo
- Halabuurka fanka/Nashqadeynta
- Si fiican u isticmaalida qalab kala duwan
- Qurxinta (rendering) iyo u fiirsashada
- Farsamada
- Soo bandhigida

WAAYAHA SHAQADA IYO WAXBARASHADA FARSAMADA

Akadamiga Fanka ee Boston wuxuu ku sharfan yahay inuu kamid noqdo qoyska Waxbararshada Farsamada & Waayaha Shaqada ee Perkins (CTE). Tan iyo markii la aasaasay, BAA waxay soo bandhigtay barnaamijyo CTE oo bixiya waayo-aragnimada nolosha dhabta ah ee qeybaha shaqada ee haatan aadka loo rabo. Waxaan bixinaa barnaamij uu gobolku liisan siiyay oo ah Nashqadeynta iyo Xiriirka Muuqaalka iyo sidoo kale barnaamijyada barashada kormeerida, sameynta filimada, masraxa farsamada iyo tiknoolajiyada muusika.

Manhajka Nashqadeynta iyo Xiriirka Muuqaalku waa koorsooyin afar sanno oo xiriir ah kuwaas oo ay ardaydu ku dhisaan xirfadaha hal abuurnimada, ereyada iyo hababka la xiriira nashqadeynta garaafyada, sawirada, sawir qaadista dijitaalka iyo qolka madow, qaabeynta 3D iyadoo loo marayo hanaanka nashqadaha dhismaha iyo nasqadeynta gudaha, nashqadeynta aqoonsiga/summada, garaafyada fiidiyaha iyo filin kartoonka 2D, nashqadeynta baraha interneetka iyo aasaaska HTML iyo sameynta baraha interneetka CSS. Ardaydu waxay fursad u heystaan inay qaataan shahaadeysiinta barnaamijyada koombuyuuterka ee Adobe kuwaas oo u saamaxa inay nashqadeeyaan oo ay gudbiyaan fikrado cusub oo loogu talogalay daabacida, baraha interneetka ama telefoonada casriga ah.

“Intii aan dhiganayay BAA waxa sharaf ii ahayd inaan ag joogo oo aan la shaqeeyo farshaxano dareen xoog leh oo kala duwan. Jawiga iyo enerjiga BAA wuxuu iga caawiyay inaan yeesho habdhaqanada i caawiyay xirfadoole ahaan”

CH 74 Nashqadeynta iyo Xiriirada Muuqaalka
TAXANAHA KOORASKA

FASALKA	MACLUUMAADKA KOORASKA	SHAHAADEYSIINTA AQOONSIGA
FASALKA 9	**NASHQADEYNTA 1 (DESIGN 1) (725-101)** Dhibcaha: 3 1 Simistar	
FASALKA 10	**NASHQADEYNTA 2 (DESIGN 2) (725-201)** Dhibcaha: 3 1 Teeram **SAWIR 1 (PHOTO 1) (725-205)** Dhibcaha: 3 1 Teeram	
FASALKA 11	**NASHQADEYNTA 3 (DESIGN 3) (725-301)** Dhibcaha: 3 1 Teeram **SAWIR 2 (PHOTO 2) (725-305)** Dhibcaha: 3 1 Teeram) **CARWOOYINKA 1 (EXHIBITIONS 1) (725-204)** Dhibcaha: 3 1 Teeram	
FASALKA 12	**NASHQADEYNTA 4 (DESIGN 4) (725-401)** Dhibcaha: 3 1 Teeram **CARWOOYINKA 3 (EXHIBITIONS 3) (725-304)** Dhibcaha: 3 1 Teeram	SHAHAADEYSIINTA QEYBTA SHAQADA GUUD EE OSHA 10-HR (ACA) BARNAAMIJKA SAWIRADA EE ADOBE PHOTOSHOP